IIB MAGALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية — الجريدة

Sannadka 14aad Muqdisho, 30ka Sebtember 1986 L. 2 r 9

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER—SHARCI L. 2 ee 8 Sebt. 19[illegible] Wax ka beddelid Canshuurta Gadidda. BOG. 671

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

QAYBTA SAD/XAAD

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Rashiid Aadan, Maxamed Axmed L. 591 » 673

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Faaduma Maxamed Geeseey L. 592 » 674

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Walaalaha Shaamoo L. 593 [illegible]

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Mire Cali Cosoble L. 594 » 676

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Cabdulcasiis Iimaan Nuur L.595 » 677

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Cabdi Sheekh Xasan L.596 » 678

DAWLADDA HOOSE MUQ. 15.1.85, Naado Dhul J.le Maxamed Cali Cariif L.597 » 679

DAWLADDA HOOSE MUQ. 22.1.85, Naado. Dhul J.le Cabduraxmaan Muxyadiin Nuur L. 598 » 680

DAWLADDA HOOSE MUQ. 26.1.85, Naado Dhul J.le Cabdurasuul Xuseen Yuusuf L. 599 » 682

DAWLADDA HOOSE MUQ. 23.12.84, Bed. Naado Dhul J.le Jimca Cilmi Xayle L.600 » 681

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.8.86, Lumid Jeeg War. L. 0273115 ku qoran Shariif Xasan Shariif L. 601 » 683

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 27.8.86, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Muxyadiin Cali Xasan L. 602 » 68.

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.9.86, Lumid Jeeg War. L. 11886 ku qoran Cumar Cali Jaamac L. 603 » 685

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.9.86, Lumid Jeeg War. L. 177916 ku qoran Caasha Samatar Yuusuf L. 604 » 686

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 26.8.86, Lumid Jeeg War. L. 641069 ku qoran Muuse Maxamed Samatar L. 605 » 687

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 13.9.86, Lumid Jeeg War. L. 0301401 ku qoran Cumar Maxamed Cabdulle L. 606 889 «

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.9.86, Lumid Jeeg War. L. 0331663 ku qoran Xasan Faarax Buuni L. 607 » 689

MAXKAMADDA G. HARGEYSA, 11.9.86, Lumid Jeeg War. L. 0244904 ku qoran Cali Xasan Xaaji L. 608 » 690

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 9.9.86, Lumid Buug Kayd L. 1408 ku qoran Biyood Xaashi Canshuur L. 609 » 691

MAXKAMADDA G. SH/DHEXE, 14.6.86, Lumid Jeeg War. 1925507 ku qoran Xasan Cumar Guuleed L. 610 » 692

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 15.9.86, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Jeylaani Munye Aadan L. 611 » 693

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 259.86, Lumid 2 Jeeg War. ku kala qoran Daahir Shooble Daahir iyo Cabdirashiid Xaaji Daa'uud L.612 » 694

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR 28,9,86 Lumid Jeeg War. L. 00112249 ku qoran Cabdulqaadir Jaamac Xasan L,613 » 695

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY 31,8,86 Lumid Jeeg War, L, 0395631 ku qoran Xuseen Samow Ibraahim L, 614 » 696

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA, 15.9.86, Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cusmaan Diiriye Rooble L. 615 » 700

## QAYBTA LABAAD

## XEER

XEER—SHARCI L. 2 ee 8 Sebt. 1986, Wax ka beddelid Canshuurta Gadidda.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Xeer-Sharci L. 2 ee 7 Jannaayo 1984, kuna saabsan Canshuurta Gadidda;

ISAGOO GAROWSADAY: Baahida loo qabo in wax laga beddelo ciqaabta ku xusan qodobka 15aad ee Xeer-Sharciga Canshuurta Gadidda;

IYADOO UU SOO JEEDIYEY: Wasiirka Wasaarad da Lacagta;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer—Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qodobka 15aad ee Xeer-Sharci L. 2 ee 7 Jannaayo 1984 oo loo rogay Sharci L. 12 ee 21.1.1984, waxa loo beddelay sida soo socota:-

1. Qof kasta ee gudan waaya waajibaadyada ku saabsan samaynta ama isu samaynta qaansheegato iyo haynta buugaagta ku xusan qodobka 10aad, wuxuu gelayaa gef ganaaxiisu yahay Sh.So. 3.000/= ilaa Sh. So. 12.000/=.

2. Qof kasta oo bixin waaya canshuurtii ku waajib tay ama bixiya tiro ka yar intii waajibtay wuxuu mutaysanayaa ganaax dhan 20% ee canshuurtii baaqatay bil kasta, kana aan yarayn Sh.So. 2.000/=.

3. Qof kasta ee fulin waaya waajibaadka ku xusan qodobka 14aad ee Sharciga Canshuurta Gadidda, haddii falkaasi uusan keenaynin dembi culus, wuxuu mutaysa-

nayaa ganaax u dhexeeya Sh. So. 4.000/= ilaa Sh. So. 24.000/=.

Qod. 2aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS, isla markaana waxa loo gudbinayaa Golaha Shacbiga Qaranka si Sharci loogu rogo.

Muqdisho, 8 Sebt. 1986

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

### NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Rashiid Aadan, Maxamed Axmed, Maxamuud Cabdi, Cabdullaahi Cali Faa rax, Maxamed Abuukar M. ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 10.5.84 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada ———— qaabkiisu yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 150X300 kuna fadhiya mq. 45.000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Waddada Jesiira

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar ki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Ra smiga ah ee D/H. Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.—

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 591

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Faaduma Maxamed Geeseey ay u soo qoratay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikh-du ahayd 30.12.84, ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada ——— qaabkiisu yahay Rettangolar adimihiisuna yihiin 20X40 kuna fadhiya mq. 800.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa kak xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 433-434

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lambar 437-438

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga ar arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 592

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Walaalaha Shaamoo ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 19.11.84 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wadajir Waddada — —— qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 150X100 kuna fadhiya mq. 15,000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Sahra

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 593

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.ic Mire Cali Cosoble uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 27.11.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Waddada ——— ——— qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 27x13,50 kuna fadhiya mq. 364

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1264

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lambar 1269-1267

Bari waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D. HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabd. [illegible])

L. 594

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdulcasiis Iimaan Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose eeMuqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 12.4.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ———— qaabkiisu yahay Trabesiyo addimihiisuna yihiin 12+7).20 kuna fadhiya mq. 190.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhulkiisii hore

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul dad

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga dooddi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Joem. Maxamuud Cabdi Cismaan

L. 595

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdi Sheekh Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaq-Shiid Waddada ——— qaabkiisu yahay Afar Gees Isle'eg addimihiisuna yihiin 100X100 kuna fadhiya mq. 10.000/=.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul.-

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

MAAMULAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 596

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamed Cali Caarif uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 27.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley Qaabkiisu yahay Afar Gees Isle'eg Addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

Bari waxaa ka xiga: Waddada J. Daa'uud.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 15 Gen. 1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 597

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabduraxmaan Muxyadiin Nuur iyo Cabdulqaadir Maxamed ay u soo qorteen arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 25.11.1984 ay ku weydiisteen gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Waddada B/Qaasim qaabkiisu ayhay Quadrato addimihiisuna yihiin 48X48 kuna fadhiya mq. 2.304.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga; Waddada Bender Qaasim

Koofur waxaa ka xiga; Waddo

Galbeed waxaa ka xiga; Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul dad

arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka

Qotkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 22.1.1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(Jeom. Maxamuud Cabdi Cismaan)

L. 598

# DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdurasuul Xuseen Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 9.9.84 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Hodan Waddada Afgooye-Xamar qaabkiisu yahay Rettangolar addimihiisuna yihiin 150X120 kuna fadhiya mq. 18.000.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Afgooye-Xamar

Koofur waxaa ka xiga: Gofka Maxamuud Maxamed

Galbeed waxaa ka xiga: Goofka Axmed Maxamed

Bari waxaa ka xiga: Goofka Muuse Sheekh.

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.
Muqdisho, 26.1.1985

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 599

## DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO WAAXD ADHULKA RASMIGA AH BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J.le Jimca Cilmi Xayle maalintu taariikhdu ahayd 15.10.61 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Wardhiigley Qaabkiisu ahaa Trabesiyaale Addimihii-suna ahaayeen 40; 30; 17, kuna fadhiyey 1200 MQ. looga qaaday dan guud awgeedloogana beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wardhiigley sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray lambarkeeduna ahaa 1460/539 ee 4.6.68 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta guud awgeed wuxuu ku yaal Deg. Wardhiigley, Qaabkii-su waa ELLE, Addimihiisuna yihiin 23, 13, 50) + (13,50-X19,20) kuna fadhiya 569,70 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada cusub

Bari waxaa ka xiga: Xasan Cali M. iyo Cali Cumar

Muqdisho, 23.12.1984

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
(J.le Maxamuud Cabdi Cusmaan)

L. 600

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Shariif Xasan Shariif;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lr. 0273115, lagana sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 50.000/= kuna qoran yahay magaca J.le Maryan Cabdi Yuusuf sida ku cad war. Lam. 0532 Tr. 18.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Lr. 0273115 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= kuna qoran yahay magaca J.le Maryan Cabdi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Shariif Xasan Shariif lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 50.000/= oo ah beddelkii Jeegga L. 0273115 ee kor ku tilmaaman, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 beri, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.8.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 601

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Muxyadiin Cali Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg Lr. 110024-110027-110028-110029 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/ kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaceyte Xuseen sida ku cad warqadda Lam. 3745 Tr. 27.8.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Lr. 110024-110027-110028-110029 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Boosaaso kuna jirto midkiiba Sh.So. 100.000/= isugeyn 400.000/ kuna qoran magaca J.le Xuseen Gaceyte Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Boosaaso in ay siiso J.le Muxyadiin Cali Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 400.000/= oo ah beddelkii Jeegagga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga billaabo maalinta [illegible] lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.8.1986

L. 602

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cumar Cali Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lr. 11886 NCR. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/ kuna qoran magaca J/le Cumar Cali Jaamac sida ku cad warqadda Lam. 6512 Tr. 7.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEESIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 11886 NCR. laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Cali Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad in ay siiso J.le Cumar Cali Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga billaabo maalintago'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L 603

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
QAYBTA MADANIGA
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Caasha Samatar Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 177916 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Xadde Guure Afey sida ku cad warqadda Lam. 9082Tr. 6.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 177916 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xadde Guure Afey;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Caasah Samatar Yuusuf lacagta cadadeedu tahay **Sh.So. 100.000/=** oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 604

MAXKAMADDA G.W/G. HAGEYSA

MGH/26/86, Taariikhda 26.8.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Muuse Maxamed Samatar, kuna taariikhaysan 11.8.86, uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee hoos ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa iyo Maamulaha Guud u wada diray ee taariikhdiisu tahay 23.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Lam. yahay 0846 ee taariikhdeedu tahay 24.8.86, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa, ayna ku caddeeyeen in Jeeggaas Wareega ee lumay ee Lam. yahay 641069 ee Lacagtiisu tahay 14,950/ Shilin, ee ku taariikheysan 18.8.86 lagana sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa, loona sameeyey Sheekh Geedi Maxamed Shire;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaas Wareega ee lumay Lacagtiisa uu iska leeyahay Muuse Maxamed Samatar;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay ee lambarkiisu yahay 641069 loona cusbooneysiiyo Muuse Maxamed Samatar, Cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Iridihiisa si ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay uga soo qortaan cabasho had ii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda Gobolka W/G. Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 605

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cumar Maxamed Cabdulle;

HADDU UTIXGELIYAY: In uu lumay Jeeg War. Lr. 0301401 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000/ kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Cabdulle sida ku cad warqadda Lam. 9367 Tr. 13.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lr. 0301401 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna jirto lacag dhan Sh.So. 45.000/= kuna qoran magaca J.le Cumar Maxamed Cabdulle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo in ay siiso J.le Cumar Maxamed Cabdulle lacagta cadeedu tahay 45.000/= oo ah beddelkii Jeegga kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 606

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xasan Faarax Buuni;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg Lr. 0331663 iyo 0331665 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000/= iyo 40.000/ isugeyn 90.000/ kuna qoran magaca J.le Xasan Faarax Buuni sida ku cad warqadda Lam. 9560 Tr. 18.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento- Jeegagga Lambarradoodu kala yihiin 0331663 iyo 0331665 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta laad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 50.000/ iyo 40.000/= isugeyn 90.000/ kuna qoran magaca J.le Xasan Faarax Buuni.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. laad ee Hargeysa In ay siiso Jaalle Xasan Faarax Buuni lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000/= oo ah beddelkii Labada Jeeg ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

I. 607

MAXKAMADDA G.W/G. HARGEYSA

MGH/28/86 Hargeysa 11.9.86

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cali Xasan Xaaji Isxaaq ee 6.9.86 uuna ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee Lam. hoos ku xusan yahay;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u ala diray ee 9.8.86;

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Hargeysa ee Lam. yahay 0892 ee 7.9.86 in Jeeggaasi Lam. yahay 0244904, taariikhdiisuna tahay 16.6.86 Lacagtiisuna tahay 50.000/= kuna qoran magaca Cabdulqaadir Maxamed Ciise, lagana sameeyey Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.65kii;

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee Lumay ee Lambarkiisa, Taariikhdiisa, Lacagtiisa, magaca ku qoran iyo Laanta laga sameeyeyba kor ku xusan yihiin uu lacagtiisa iska leeyahay Cali Xasan Xaaji Isxaaq cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata muddo 15 maalmood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaa Wareega ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/G. Hargeysa
(Ibraahin Faarax Maxamed)

Kaaliyaha Maxkamadda G.W.G. Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 608

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Biyood Xaashi Canshuur;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 1408 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.872.85 kuna qoran magaca J.le Biyood Xaashi Canshuur sida ku cad warqadda Lam. 705 Tr. 9.9.86 ee ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lambar 1408 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 4.872.85 kuna qoran magaca J.le Biyood Xaashi Canshuur Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir in aii siiso J.le Biyood Xaashi Canshuur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 4.872.85 oo ah beddelkii Buug Kaydka kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah lagakeenin.

Muqdisho, 9.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L 609

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/DHEXE JOWHAR

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sh/Dhexe Jowhar

HADDUU ARKAY: Arjiga dacwadda ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo Ogeysiiska Bangiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69-9-9-65 L.2 Lumidda Jeegga Wareega lamb. 192507, ku qoran Xasan Cumar Guuleed.

Wuxuu amrayaa in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega maalka dib markii ay ka soo wareegto 15 shan iyo toban maalmood, maalinta Degereetada lagu Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dowladda.

Waxaa la codsanayaa in Jeegga Wareega ee la sameyn doono gacanta laga saaro Xasan Cumar Guuleed ama ciddii Wakaalad sharci ah ka wata isaga oo la sugayo muddada aan kor ku soo sheegnay.

Jeeggaas oo ku qoran Sh.So. 7.900/=.
Jowhar, 14.6.1986

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sh/Dhexe Jowhar
(Dr. Bashiir Raabi Faarax)

L. 610

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Jeylaani Munye Aadan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg Wareega Lr. 009077-009078 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 40.000/= kuna qoran magaca J.le Cali Nuur Cali Ayaanle sida ku cad warqadda Lam. 9395 Tr. 14.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lr. 009077-009078 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 40.000/= kuna qoran magaca J.le Cali Nuur Cali Ayaanle.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Kismaayo in ay siiso J.le Jeylaani Munye Aadan lacagta cadadeedu kor ku qoran tahay oo ah bedelkii Jeeg. War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga biliaabo maalinta go'aanka lagu lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 15.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 611

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDU UARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Mustafa Aadan Ciise;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen (2) Laba Jeeg War. Lr. 057607-0576708 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wardhiigley kuna jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= isugeyn 200.000/ kuna ka.a qoran yihiin magacyada J.le Daahir Shooble Daahri iyo Cabdirashiid Xaaji Daa' d sida ku cad warqadda Lam. 424 Tr. 24.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lamb. 0576707-0576708 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna kala jirto midkiiba lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna kala qoran yihiin J.le Daahir Shooble Daahir iyo Cabdirashiid Xaaji Daa'uud.

WAXAA LA FARAYAA

Bangiga Ganacsiga iyoKaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Mustafa Aadan Ciise lacagta ca.dadkeedu kor ku qoran yahay oo ah beddelkii (2) Labadaasi Jeeg War. ee kor ku xusan, maray ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.9.19x6

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 612

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cabdulqaadir Jaamac Xasan.

HADDUU TIXGELIYEY: In Jeeg Wareega Dhumay L. 00112249. Laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Balcad kuna qoran kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Dhaqane Yuusuf Maxamed sida ku cad Warqadda Lr. 6539 ee Tr. 28,9,86 ka soo baxday Bankiga Ganac siga iyo keydka Soomaaliyeed Lanta Koowaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9,9,1962dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg Wareega Lr. 00112249 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maaliyeed Laanta Balcad kuna jirto Lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J/le Dhaqane Yuusuf Max/d.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Balcad in ay siiso J/le Cabdulqaadir Jaamac Xasan Lacagta Cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah beddelkii Jeegagga kor ku Xusan. Markay ka soo wareegto muddo aan ka yaren 15 Bari ah laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah laga keenin. Y

Muqdisho, 28.9.86.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Banaadir
Dr. Cabdi Sa'aad Shongole

Kaaliyaha Maxkamadda
Cabdulqaadir Cali Xaaji
613

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY EE BAYDHABO

MARKUU ARKAY: Arjiga Codsiga Baafinta Jeega ee ku Tr. 31,8,86.

MARKUU ARKAY: Dacwadda Kor ku Qoran.
MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsantahay iyo Ogeysiis ka Bankiga.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9/9 65 D. iyo Lumidda J. L. 0395631 ayna ku qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 100.000 Shillin.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga ka dib markii ka soo War eegto 15 Casho maalinta Dekareetada lagu shaacyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waxaa la caddeynayaa in Jeegaas Cusub loo sameyn doono Gacanta laga saaro J/le Xuseen Samow Ibraahim, Ama Qof isla Asaga ka sita Wakaalo Sharci ah iyadoo la sugayo 15 Beri.

Guddomiyaha Maxkamadda Gobolka Bay
Sheekh Xuseen Macallin

L. 614

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/29/86 Taariikhda 15.9.86

UJEEDDO:- Digireeto Cusboonaysiin Afarta Jeeg Wareega ee lumay ee Lambarradooda, Lacagtooda, Laanta laga sameeyey, Taariikhdooda iyo magaca loo sameeyey mid walba, oo kala ah Sidan:-

1) J.W.No. 22764 ee 22.5.86 ee Sh.So. 20,000/= u qoraa Axmed Cali Xuseen, laga sameeyey Laanta Qardho.

2) J.W.No. 0276892 ee 20.7.86 ee Sh.So. 50,000/= ku qoraa Axmed Ismaaciil, laga sameeyey Laanta laad ee Hargeysa.

3) J.W.No. 348692 ee 3.5.86 ee Sh.So. 19.650/= ku qoraa Xuseen Maxamuud, laga sameeyey Laanta laad Hargeysa.

4) J.W. No. 456837 ee 5.7.86 ee Sh. So. 50.000/= ku qoraa Maxamed Ibraahin Yuusuf, laga sameeyey Laanta Kismaayo.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Cusmaan Diiriye Rooble ee 13.9.86 ee uu ku codsanaayo in loo Cusboonaysiiyo Afarta Jeeg Wareega ee lumay ee Lambarradoodu kor ku xusan yihiin;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud u kala diray ee 28.8.86;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa ee lambarkeedu yahay 0909 ee 14.9.86 ee ay ku soo caddeeyeen Afarta Jeeg Wareega ee lumay Lacagtooda, taariikhdooda, Laanta laga sameeyey, magaca loo sameeyey iyo Lambarradooda.

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeegaggaasi lumay ku qoran uu iska leeyahay Cusmaan Diiriye Rooble;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee 9.9.65kii;

WUXUU GO'AAMIYEY

348692, 4) J.W.No. 456837, in loo cusboonaysiiyo Cusmaan Diiriye Rooble, cusbooaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood-ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib maalinta Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta Hargeysa in uu ku dhejiyo Nuqulka go'aankan Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaa Wareega ee lumay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Ibraahim Faarax Maxamed)

Kaaliyaha HMaxkamadda G. W/G. Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 615

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Diiriye Axmed Ducaale;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 78789 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Diiriye Axmed Ducaale sida ku cad-warqadda Lam. 2942 Tr. 21.9.86 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962dii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lr. 78789 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Diiriye Axmed Ducaale.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J.le Diiriye Axmed Ducaale lacagta cadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah beddelkii Jeegga War. ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horraysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.9.1986

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shangole)

L. 616